
# KRATOM IYIO 7-OH

Kratom iyo 7-OH labadaba waxaa si sharci ah looga heli karaa kaalmo shidaal, dukaamada xaafadaha, iyo dukaamada fiitamiinnada. Marar badan waxaa la dhigaa isku meel xitaa waxaa lagu iibin karaa magaca isku midka ah. Laakiin 7-OH iyo Kratom isku mid ma aha. Fahamka farqiga u dhexeeya labadooda wuxuu kaa caawin karaa inaad badbaado ku jirto.

| | KRATOM | 7-OH |
|---|---|---|
| **WAA MAXAY** | Waa walax dhireed laga sameeyo caleemaha la qalajiyey ee geedka Mitragyna speciosa. | Waa walax u eg opioids-ka oo ah mid si xooggan loo ururiyey, qayb ahaanna shaybaar lagu farsameeyey, lagana sameeyo Kratom.<br>Badanaa si khaldan ayaa loogu iibiyaa magaca Kratom." dabiici ah." |
| **SIDEE LOO SAMEEYAA** | Caleemo la qalajiyey ama la shiiday oo si yar loo farsameeyey. | Waxaa lagu farsameeyaa shaybaarro. Waxa laga yaabaa in lagu qaso biraha culus ama walxo kale oo waxyeello leh. |
| **SAAMAYNTA** | **Qiyaaso yar:** Waxay kordhin kartaa tamarta waxayna kor u qaadi kartaa niyadda.<br>**Qiyaaso badan:** Waxay yareyn kartaa xanuunka waxayna keeni kartaa hurdo ama suuxdin. | Waxay keeni kartaa farxad xad-dhaaf ah, hurdo ama suuxdin, dulqaad degdeg ah oo jirku yeesho, iyo rabitaan xooggan oo ah in mar kale la isticmaalo. |
| **XOOGGA SAAMAYNTA** | Qiyaaso badan saamaynteedu waxay la mid noqon kartaa opioid fudud. | Waxay keeni kartaa saamayn u eg opioids-ka xitaa qiyaasaha ganacsi ahaan loo iibiyo. |
| **QADARKA 7-OH** | Waxay ka kooban tahay xaddi aad u yar oo 7-OH ah, badanaa wax ka yar 2% wadarta maaddooyinka alkaloid-ka ah. | Aad bay u urursan tahay. Qaar ka mid ah alaabooyinka waxay yeelan karaan ilaa 500% ka badan 7-OH marka loo eego Kratom-ka dabiiciga ah. |
| **KHATARAHA** | Lalabbo, dhaawac beerka ah, ku-tiirsanaan, iyo calaamadaha ka-noqoshada oo u eg kuwa opioids-ka.<br>Khatartu way sii kordhaysaa marka qiyaasta iyo muddada isticmaalka ay bataan. | Ku-tiirsanaan, balwad, beer-shaqo-gab, suuxdin,qaadasho xad-dhaaf ah, wadne-istaag.<br>Khatartu waxay sii kordhi kartaa marka lala isticmaalo dawooyin dhakhtar qoro ama daroogooyin sharci-darro ah. |
| **XAALADDA SHARCI IYO KORMEERKA** | Waa sharci, laakiin FDA ma ansixin. | Ma laha nidaam kormeer oo rasmi ah, mana hoos yimaado kormeerka FDA ama DEA. |

Sida aad arki karto, Kratom iyo 7-OH labaduba waxay leeyihiin khataro caafimaad oo halis ah. Laakiin 7-OH ayaa ah khatarta ka weyn: waa walax opioid ah oo aad loo ururiyey, aan si rasmi ah loo nidaamin, si fududna loo qabatimi karo, si ballaaranna loo heli karo, waxaana sii kordhaya xiriirka lala sameeyo overdose iyo dhimasho. Ha ku kadsoomin baakadka ama muuqaalka alaabta.



**ISKAANGAREE SAWIRKA ISKAANKA SI AAD WAXBADAN UGA OGAATO AMA BOOQO**
KNOWTHEDANGERS.COM/KRATOM

KNOW THE DANGERS .COM